Wax ku-barashada Cayaarta ee muddada carruurnimada hore

Waa maxay cayaartu? Cayaartu waxay ugu timaadaa carruurta si dabiici ah waxayna muhiim u tahay waxbarashada iyo koritaanka carruurta iyo dareenkooda qof ahaan. Cayaartu waxay qaadataa qaabab badan, waxayna u dhacdaa siyaabo badan, cayaaraha gudaha iyo kuwa dibadda, waxaa ku jiri kara hal qof ama wax ka badan hal qof, waxay noqon kartaa mid firfircoon ama mid fadhiid ah, waxay u leedahay macno iyo qiimo gaar ah dadka ka soo-qaybgala cayaarta, waxaa ku jira fikir waxayna noqon kartaa mid abaalmarin leh oo xiiso badan.

"Cayaartu waxay carruurta siisaa fursado ay wax ku bartaan markay wax sahminayaan, abuurayaan, wax cusub qabanayaan, iyo marka ay wax mala-awaalayaan. Cayaartu waxay bixisaa baya'd taageero leh markaas oo ay carruurtu sulaalo weydiin karaan, masalooyin xallin karaan ayna ka qaybgeli karaan dood xasaasi ah. Cayaartu waxay ballaarisaa fikirka carruurta waxayna horumarisaa jaceylkooda inay wax ogaadaan iyo inay wax bartaan." (EYLF, 2009 p. 15).

Daraasadaha caalamka laga sameeyey waxay muujiyeen inay carruurtu wax ku bartaan oo ay horumaraan markay ku jiraan waayo-aragnimo ku salaysan cayaar ujeeddo leh.

Barayaasha la shaqeeya carruurta ku jirta xiliga carruurnimada hore sida, Kindhaha, Childcare, Family Day Care iyo Daryeelka Saacadaha dugsiga Ka-baxsan, waxay qorsheeyaan barnaamij si ay u daboolaan

muraadyada iyo baahiyaha shaqsiga ee ilmo kasta. Barayaasha waxay sameeyaan sidaas ayagoo bixiya waayo-aragnimooyin ku salaysan cayaaro ballaaran oo ka dhaca beya'd waxbarasho oo furan, halkaas oo carruurtu isaga gooshi karaan goobaha cayaaraha gudaha ilaa kuwa dibadda.

Barayaashu waxay badanaa isticmaalaan xeelado waxbaridda oo kala duwan si loo taageero carruuraha oo dhan inay horumariyaan jacaylka waxbarashada, inay wax kasta ogaadaan, weydiin badnaadaan ayna u xiisa qabaan adduunkooda iyo dadka ay la kulmaan. Ayagoo cayaaraya carruurtu way mala-awaalaan, isku dayaan, abuuraan, sahmiyaan, baaraan, ka wada-xiriiraan, is-weydiiyaan, hadlaan, dhagaystaan, fakaraan, dareemaan, taabtaan, ama uriyaan. Cayaarta waxaa ka mid ah wada-xaajoodka, xallinta masalooyinka, is-khatar-gelinta, wax cusub isku dayidda, eegidda sida waxyaaluhu u shaqeeyaan. Waxay wax ka bartaan naftooda iyo tan dadka kale waxay bartaan xeerarka cayaarta, saaxiibo samaystaan, calaaqaad samaystaan ayna ku kalsoonaadaan dadka la nool, oo ah barayaasha iyo carruuraha kale. Cayaartu waxay carruurta siisaa fursadaha inay damaashaadaan, wax qabtaan, saaqidaan, guulaystaan, qaladaad sameeyaan, tababartaan, macluumaad ama xirfado cusub tijaabiyaan, fikrado sameeyaan xakameeyaan xirfadaha iyo aqoonta cusub.

Waayo-aragnimooyinka cayaaraha gudaha iyo kuwa dibadda oo ay soo qorsheeyaan barayaashu oo aad filan karto inaad aragto waxaa ka mid ah: sawiridda,ku jaridda iyo iskula qabashada maqasyada iyo koolada, adeegsiga waxyaalaha dib loo farsameeyo, baloogyo dhisidda, tooyada dhismayaasha ah, hal-xiraalaha, cayaarta rasan, ku midabaynta farta, qodidda dhooqada, iska yeelida wax ku karinta bacaadka, cayaarta cinjir samaynta iyo dhoobada, cayaaraha dheelaha, cayaarta riwaayadda, labisashada, boonbalada, midabaynta, burisaynta, qoob-ka-cayaarka, heesidda, fuulidda, boodida, ordida, boodboodida, ku dhagaysiga sheekooyinka lngiriisiga iyo luqadaha kale, sheegida sheeko xariirka, cayaaraha mala-awaalka, aqrinta buuggagta, cayaarta biyaha, jardiin samaynta iyo waxyaalo badan oo kale.

Cayaartu waa u muhiim carruurta oo dhan, waxay ka caawisaa inay sameeyaan dareemidda adduunkooda waxayna sii wadaan inay sameeyaan dareenka xooggan ee qofnimadooda. Carruurtu waxay mararka qaarkood u cayaaraan keli ahaan, mid mid ama laba carruur oo kale ama waxay u cayaaraan kooxo carruureed yaryar ama weyn. Cayaartu waxay noqon kartaa mid buuq leh ama mid deggan, fadhiid ama mid firfircoon.

Cayaartu waxay bixisaa fursadaha horumarinta jireed taas oo kordhisa isku-kalsoonaanta carruurta, waxayna xoojisaa muruqyada yaryar iyo kuwa waaweyn waxayna caawisaa isku miisanaanta carruurta.

Carruurtu waxay adeegsadaan malahooda si ay u qabtaan waxay arkaan, tusaale, -. Iska-dhigidda inay diyaarinayaan cuntada ama daryeelayaan cunug, ama iska dhigaan dab-damiye, dhaqtar, ama

dukaanle. Taas waxay ka caawisaa carruurta inay bartaan inay fahmaan kaalimaha kala duwan oo ay dadku ka qabtaan bulshada dhexdeeda.

Waxbaridda iyo tilmaamidda rasmiga ah ee aqoonta iyo xirfadaha la siiyo carruurta ka hor intaysan diyaargaroobin waxay carruurta u keeni kartaa inay la kulmaan luminta isku-kalsoonaanta, ka-dheeraanshaha, akhlaaq aan la aqbali Karin ama dareenka fashilka. Wax-ku-barashada cayaarta waxay carruurta u ogolaataa inay qiyaastooda wax ku bartaan ayna helaan isku kalsoonaanta aqqonta iyo xirfadaha looga baahan yahay in laysku dayo ra'yiga iyo howlaha aadka u kakan.

Marka carruurtu ka gudbaan xiliga carruurnimada hore una gudaan dugsiga hoose waxay si tartiib-tartiib ah uga gudbaan cayaarta ku salaysan waxbarashada una gudbaan qaabka tilmaan-bixinta rasmiga ee waxbarashada.

Barayaasha xiliga carruurnimada hore waxay adeegsadaan habab wax-barid oo ballaaran. Waxaa jiri doona nashaadyo toosan qaarkood oo ka jira adeegyada uu ilmaheenu tago, kuwaas oo ah kuwo rasmi ah, sida muusiga, sheekooyinka iyo wada-hadalka. Maalinta oo dhan, carruurtu waxay sameeyaan go'aamo ay ayagu leeyihiin oo ku saabsan halka ay ku cayaari doonaan, cidda ay la cayaari doonaan, iyo intay ku qaadan doonto nashaadka cayaarta gaarka ah. Barayaashu waxay siiyaan taageero iyo hagid markay carruurtu u baahato caawimaad.

Markay carruurtu go'aansato inay cayaaraan, waxaa jiri doona xeerarka qaarkood kuwaas oo ku caawin doona inay bartaan akhlaaqaha ay aqbali karaan dadka kale. Xeerarku waxay carruurta ka caawiyaan inay ammaan helaan, inay daryeelaan qalabka ayna taageeraan caddaaladda iyo sinnaanta. Tusaale, carruurtu waxay xeerar u samayn karaan sugitaankooda tookadooda laalacshowga. U ogolaanta carruurta inay ka qaybgalaan samaynta xeerarka waxay caawinaysaa fikirkooda iyo xirfadahooda xallinta masalooyinka, wada-xiriirka iyo xirfadahooda bulsho iyo sidoo kale xirfadahooda aqris-qoraal iyo xisaabeed. Xeerarku waxay u baahan yihiin inay noqdaan kuwo fudud intii suurtagal ahba iyo inay ku habboon yihiin da'da carruurta iyo marxaladda koritaan si loo garto ujeeddadooda.

Markay ku jiraan cayaartooda, carruurtu waxay sii dhisaan aqoontooda iyo fikradahooda markaas jira ayadoo ah siyaabo cusub oo xiisa leh. Tusaale, haddii biyaha lagu shubo ciid qalalan, biyaha waa la liqayaa ilaa inta laga gaarayo inaan ciiddu wax biyo ah liqayn, markaas oo samaysmaan balliyo biyo ah. Carruurtu waxay tirin karaan tirada weelasha biyaha ay ku qaadatay inay balli sameeyaan. Taas waxay horseedaa waxbarasho qiimo badan oo ay ku jiraan sahminta xaqiiqooyinka saynis iyo kuwa xisaabeed.

Haddaan u fiirsano markay carruuruhu dheelayaan, waxaan aragnaa inay si joogto ah u feejigan yihiin, ayagoo adeegsanaya aragtidooda, maqalkkooda, taabashadooda iyo maraka qaarkood dhadhankooda waxbarashada oo ku saabsan adduunka.

Learning through play - *Somali*

Wax ku-barashada Cayaarta

Carruurtu waxay soo celceliyaan nashaadyada qaarkood marar badan, is-khatar-gelin, barashada iyo ku-tababarashada xirfadaha, sida ayagoo fuula meelo sarsare ama barashada hal-xiraaleyaasha, qaadashada dharkooda ama farshaxan samaynta, wax ku miisaamidda miisaan ciriiri ah, adeegsiga maqasyada, iskood u boodboodida ama isku-riixidda laalac-showga. Waxqabadyadan ha weynaadaan ama ha yaraadaane waa kuwo abaalmarin u leh ilmaha, qoysaska iyo barayaasha kuwaas oo taageera waxbarashadooda.

Cayaartu waxay carruurta siisaa fursado ay ku hadlaan ayna ku weydiiyaan su'aalo, horumariyaan oo ku tababartaan erey-bixinta iyo luqadda, aqris-qoraalka, xisaabta iyo xirfadaha bulshada. Ayagoo la cayaarayo, carruurtu waxay bartaan sida loo wada-hadlo lagulana xiriiro dadka kale.

fka CHILDREN'S SERVICES INC
Incorporating Multicultural Resource Centre

Ground Floor, 9-11 Stewart Street, Richmond, 3121
tel: +61 3 9428 4471 fax: +61 3 9429 9252
email: fkacs@fka.org.au web: www.fka.org.au
FKA Children's Services Inc. 215663278505573